Aad beerta ama xadiiqada si aad u heshid qori, caleen ama dhagax, ama sheey ka raadi gurigaaga agtiisa kaasoo dadku aysan waayin hal saac ama ka badan. Diyaarso walxaha aad heshay si ay u sameeyaan weji ama farshaxan muujinaya sida aad dareemayso.

Ma isu dheeli tiri kartaa walxaha is kor saaran si aad farshaxankaaga ugu dhigo mid dheer?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## XAQIJJINTA SHEEKO

Dooro mid ka mid ah odhaahyada xaqiijinta ee soo socda una sheeg naftaada uguna celceli. Iskuday inaad sidan samaysid adigoo muraayadda isku eegaya. Qor xaqiijinta warqad waxaana dhigtaa meel aad maalin walba ka arki kartid. Gof naxariis leh baan ahay, xoog wayn oo geesi ah. Maalin walba waan sameeyaa intii karaankeyga ah. Xor baan u ahay inaan doorto qofka aan doonayo inaan noqdo. Wax walba way iska dhammaan doonaan. Wax walba way hagaagi doonaan. Gof walba waan u naxariistaa, oo ay naftaydu ku jirto. Maalin kasta noloshayda way sii fiicnaata.

Ma samayn kartaa xaqiijinta xaaladaada?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## DAREEMIDDA SABIIB

Gacantaada ku soo qaado sabiib ama gobol qudaar qalalan ah. U fiiri sidii adiga oo aan waligaa horey u arag wax lamid ah oo kale. Ogoow faahfaahin kasta. Taabo indhahaaga oo xiran si aad u dareento qaabkeeda taabasho. Urso. Ogoow sida jirkaagu ugu falceliyo urta. Afkaaga gali adoon ruugin.. Carrabkaaga ku dareen. Dhadhami adigoo tartiib u calaalinaya. Ogoow meesha ay ka joogtid afkaaga. Ogoow waxa dhaca markaad biloowdid calaalinta iyo markaa sii wadid. Kuu dareen dhadhankeeda iyo dareenkeeda taabasho ee afkaaga dhexdiisa iyo sida ay kuwani isu bedeli karaan waqti ka dib. Laq ka dib marka aad ogaatid jidhkaagu inuu kuu sheegayo inaad sidaa sameysid. Dareen sabiibta oo sii aadeysa calooshaada oo ogoow sida jirkaagu dareemo.

Immisa cunto oo kale ayaad dareemi kartaa ka hor inta aadan cunin?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## ISKU DHEELITIR

Waxaad la ciyaari kartaa naftaada ama dad kale. Haddii aad la samaynaysa dadka kale, marba mid ha qaato si loo dheelitiro waqtina hala isku qabto. Kuwa aan dheellitirista sameynayn way wareegi karaan oo waxay isku dayi karaan inay ka qosliyaan ka is dheelitiraya si uu dheelitirku uga lumo, balse ma taaban karaan!

1. Indhahaaga ku hagaaji meel toos ah oo kaa horeysa.
2. Hal lug ku istaag.
3. Bilow tirinta oo arag inta aad dheellitirnaan karto.
4. Indhaha xidh si aad ciyaarta u sii adkeyso.
5. Isku day inaad isku dheelitirto lugtaada kale. Ma dheellitirnaan kartaa muddo dheer?
6. Hoos u dhig oo si qoto dheer u neefso. Miyay fududahay in la is dheelitiro?



Maxaa kaa dhigaya inaad lumiso dheelitirka?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## DIGSIGA SHILINADA

Waxaad la ciyaari kartaa naftaada ama dad kale.

1. Ururi ugu yaraan 5 shilin oo ku rid dheri.
2. Dooro hal shilin oo ka fiiri dhinac kasta. Xaqiiqdi aad u fiiri.
3. Kuu celi shilinka digsigaa.
4. Rux digsigaa.
5. Ma heli kartaa shilinkaagii mar kale?



Ma fiirisay laakiin ma arki weyday?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## HAGE DALXIIS

Ku wareeg gurigaaga, beertaada, xaafaddaada ama barxad oo iska dhig inaad tahay hage dalxiis oo tusaya koox dad ah agagaarka. Tilmaan muuqaallada, astaamaha iyo goobaha ugu fiican ama ugu quruxda badan. Wax walba ka dhig mid xiiso leh



Maxaad ugu jeclaan lahayd inaad booqato?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## AXMED WUXUU YIRI

Koox ahaan, ku ciyaara "Axmad wuxuu yiri". Gof ka dhiga hogaamiye. Hogaamiyuhu waxa uu bixinayaa tilmaamo ay tahay in kooxdu raacdo - laakin KALIYA haddii hogaamiyuhu amarka ku bilaabo "Axmad wuxuu yiri". Tusaale ahaan, "Axmad wuxuu yiri gacmahaaga madaxaaga saar" macnaheedu waa kooxdu waa inay gacmahooda madaxa saaraan. Hadduu hoggaamiyuhu amar bixiyo isaga oo aan odhanin "Axmed wuxuu yiri" marka hore, kooxdu waa inaanay samayn amarka. Haddii gof sameeyo ficil isagoon maqlin "Axmed wuxuu yiri" bilawga, way ka baxayaan ciyaarta. Gofka ugu dambeeya ayaa guulaysanaya.



Had iyo jeer si taxadar leh ma u dhegaysataa tilmaamaha?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## XAYAWAANKEE AYAAN AHAY?

Dooro xayawaan. Ka fikir ama fiiri sida ay u socdaan. Isku day inaa jirkaaga u dhaqaajiso sida xayaawaankaas. Haddii aad awooddo, tan ku samee koox hortooda oo arag haddii ay qiyaasi karaan xayawaanka aad tahay.




## KU DAYO SAAXIIB

Dooro qof aad taqaanid. Ka fikir ama fiiri sida ay u socdaan. Sidee bay u socdaan, madaxooda u taagaan, gacmaha u dhaqaajiyaa? Isku day inaa jirkaaga u dhaqaajiso qaabka ayaga. Haddii aad awooddo, tan ku samee koox hortooda kuwaas oo garanaya qofka oo eeg bal in ay qiyaasi karaan qofka aad tahay. Xusuusnow inaad ahaato mid naxariis badan!



Waa maxay dhawaaqyada uu sameeyo xayawaankaagu?

Maxay yihiin sifooyinkaaga gaarka ah?



EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## XILLIGII QOSOLKA

Waa maxay wixii ugu qosolka badnaa ee kugu dhacay dhawaan? Ma ka sameyn kartaa sheeko qosol leh? Awoodda saar qaybaha ugu yaabka badan oo buunbuuni dareemada, waxa dhacay iyo falcelinta dadka haddii ay ka dhigeysa mid ka sii qosol badan. Sheekadaada qof u sheeg oo eeg bal inay ka qosliso.




## WAQTIGII JILIDDA

Ka soo qaad inaad tahay tilmaame oo ogaaday inay ku xayiran yihiin gudaha sanduuq aan la arki karin. Muuji sida aad ku ogaanayso inaad ku jirto sanduuq. Isku day siyaabo kala duwan si aad uga baxdo sanduuqa. Mxaad samaynaysaa si aad ugu dambeyntii u xorowdo?



Sidee ayaad u isticmaali kartaa wajigaaga si aad sheekada uga dhigtid mid sidan ka qosol badan?

Maxaa kale oo aad jili kartaa?



EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## ISKA SHACTIREESO

Bal qiyaas in aad tahay shactiroole ku dhex jira goob-wareeg ah oo hawl-maalmeedkaagu yahay in aad raadiso wax kaa lumay oo aad dhab ahaantii xidhan tahay (koofiyada, cimaamad ama muraayadaha qorraxda madaxaaga oo madaxa kuugu jira). Muuji sida aad dareemeyso marka aad u maleyneyso inaad lumisay shaygii aad jeclayd, oo aadan heli karin dabadeedna, ugu dambeyntii, hel.



Shactiroolahaagu ma xiranyahay dhar qosol leh ama ma leeyahay waji rinjiyeysan?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## MAKIINADA DURBAANKA

Soo ururi noocyo kala duwan oo walxo adag oo godan oo aan jabin doonin. Ku garaac qaaddo bir ah, qaaddo alwaax ah iyo gacmahaaga. Muxuu u dhawaaq eeg yahay mid kasta? Ku dhufo hal shay oo leh hal laxan. Ma ku garaaci kartaa shay labaad oo leh laxan kale? Dad kale ma kus oo biirin kartaa ayagoo ku garaacaya walxo kale oo leh laxamo wada shaqeynaya?



Laxankee ayaa leh cod farxad, murugo ama cabsi leh?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## SAWIR NAFEED OO DHOOLA CADDAYNAYA

Fiiri muraayad oo ka dhig wejigaaga mid u eg dhoola cadeynta hoose. Wejige ayaa sida ugu habboon u waafaqaya dareenkaaga? Fiiri muraayad oo sawir wejigaaga adigoo muujinaya shucuurta aad dareemayso. Dooro midabada, qaababka iyo agabka ku habboon niyaddaada.



Intee in le'eg ayaad garanaysaa sida aad u egtahay marka aad dareento waxyaabo kala duwan?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## QALBI LAHOOW

Fartaada dhexda saar gudaha curcurkaaga. Ma dareemi kartaa garaaca wadnaha? Tiri inta jeer ee wadnahaagu garaaco 1 daqiiqo gudaheed. Jaranjarada kor iyo hoos u orod ama dibadda soo carar muddo 5 daqiiqo ah. Tiri Tiri inta jeer ee wadnahaagu garaaco 1kii daqiiqo gudaheed. Sidee dhakhso ah ayaad uga dhigi kartaa wadnahaaga inuu caadi ku soo laabto jimicsiga ka dib? Neefsashada qoto dheer miyay caawisaa?



Maxaa wadnahaaga ka dhigaya mid degdeg u garaacmaya?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## BIYO KUCIYAARIS

Waxaad la ciyaari kartaa naftaada ama dad kale. Haddii aad keligaa tahay, ku buuxi qaaddo weyn oo biyo ah oo arag inta aad socon karto adiga oo aanay dhibici kaa dhicin. Haddii aad haysato laba malqacadood oo isku mid ah, isku day inaad la tartanto saaxiib oo arag cidda si dhakhso ah u socon karta iyada oo aan daadin. Haddii aad haysato qaadooyin badan iyo saaxiibo badan, samee laba kooxood oo qof kasta sii qaaddo cabbirkeedu la mid yahay kuwa kale. Hal qaaddo ka buuxi biyo oo ku shub biyaha qofka kugu xiga qaadaadiisa maran ilaa qof kasta oo kooxdaada ka tirsan uu biyaha gudbiyo. Kooxda qaaddadoodu ugu biyaha badan tahay dhamaadka waa guulaystayaasha



Ma ka dhigi kartaa tan mid ka sii madadaalo badan adigoo kor iyo hoos u fuulaya jaranjarada?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## XALFAD U LABIS

Qaado inta u dhaxaysa 1 ilaa 6 shay oo dhar ah oo hel hab cusub oo aad u xidhato. Ma laabi kartaa gacmaha shaarka ama surwaalka, ama ma ku soo dari kartaa suun ama cimaamad si aad u abuurto muuqal cusub? Ogoow sida dharka iyo qaababka kala duwan ay ku dareensiyaan. Xitaa hal shaar oo siyaabo kala duwan loo xirtay ma beddelayaa muuqaalkaaga iyo dareenkaaga. Waa kee qaabka aad jeceshahay?



Dharkee ayaad kalsoonida ugu badan ku darentaa xidhashadiisa?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## ANIGA YAAN AHAY?

Ciyaartan waxaa sida ugu fiican loola ciyaara dad kale. Weydii qof inuu kuu bixiyo magaca qof caan ah, ama jilaa filim aad taqaan, qor magaca si aad dhabarkaaga ugu dhejisid. Qofkasta oo magac loo bixiyay markaas waa inuu qiyaasaa cidda uu yahay isagoo dadka kale weydiinaya su'aalo ku saabsan shakhsiyadda qofka, dhalashadiisa, kartidiisa iwm. Dadka aad waxay weydiinayso waxay ku jawaabi karaan kaliya haa ama maya. Waa inaad ku ogaataa cidda aad tahay tirada ugu yar ee su'aalaha ah.



Yaad rabtaa inaad noqotid?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## TAALLADA MUUSIGA

Tan waxaa sida ugu fiican loola ciyaara dad kale. Raadi qof ciyaara qaybta DJ kaas oo bilaabi doona oo joojin doona muusigga. Daar laxanka aad jeceshahay laakiin, marka DJ-gu joojiyo muusikada, waa inaad meel ku joogsataa. Haddii aad dhaqaaqdo iyadoo muusigga la joojiyay, ciyaarta waa lagaa saarayaa.



Waa maxay dhaqdhaqaaqaaga qoob ka ciyaarka ee ugu fiican-i? dhaqdhaqaaqaaga qoob ka ciyaarka ee ugu fiicani?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## CAAWI

Caawinta qof waxay ku dareensiin kartaa wanaag. Waydii saaxiib ama xubin qoyska ka tirsan haddii aad wax ku caawin karto. Ilaa inta ay aamin tahay, waxaad samayn kartaa wax aad ku caawiso qof qalaad sida in aad albaab u furto ama aad ka caawiso sqaadista ay alaabta ay wataan.



Immisa jeer maalinkii ayaad u malaynaysaa inaad dadka caawin karto?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## DHOOLA CADDEEY!

Dhoola cadeyntu waxay kordhisaa kiimikooyinka niyadda kor u qaada ee maskaxda ku jira. Muraayad isku eeg oo dhoola caddeey. Isku day dhoola cadeyn weyn, dhoola cadeyn yar, dhoola cadeyn aad ku aragto ilkahaaga iyo mid afkaagu xiran yahay. Si kasta oo aad u dhoola cadaysoba... waad qurux badan tahay!



Ma la wadaagi kartaa dhoola cadeyntaada qof?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## QOF LA HADAL

La xidhidhinta dadka kale waxa ay kaa caawinaysaa in aad dareento fiicnaan haddii ay taasi tahay inaad la kulanto qof, kala hadasho moobilka ama aad kala sheekaysato dhanka khadka. Qaado wakhti aad kula hadleyso qof aad jeceshahay ama aad u bogtay. Xitaa waxaad isticmaali kartaa wakhtiga Qaado si aad ula hadasho kaadhahka wada hadalka si sheekadu u bilaabato.



Yaad rabtaa inaad la hadashid maanta?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## NOOLOOW WAQTI XAADIRKA

Hoos u dhig neefsashada oo neef kasta ka dhig mid xoogaa tii hore ka weyn. Fiiro u lahoow waxa aad arki karto, maqli karto oo dareemi karto wakhtigan xaadirka ah. Waxay kaa caawinaysaa inaa degtid.



Jirkaaga maxaa ka dareemi kartaa?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## WAX KU DEEQ

Inaad wax siiso qof baahan ama siinta lacag hay'ad samafal waxay dhab ahaantii ku dareensiin kartaa si fiican. Waxay kaa caawin kartaa inaad dareento inaad muhiim tahay oo waxaad samaynaysana, si kasta oo ay u yar yihiin, ay samayn karaan isbeddel.

Raadi wax aadan u baahnayn oo aad geyn karto dukaanka samafalka ama aad siin karto qof si fiican uga faa'iidsaysan kara.



Maxaa siin kartaa qof kale si aad u caawisid?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## SEEXO

Hurdo wanaagsan oo aad heshid habeen kasta waxay muhiim u tahay in aad xaalad fiican ku sugnaatid. Isku day inaad seexato oo aad soo toosto isku wakhti maalin kasta si jidhkaagu ula qabsado laxan caadi ah. Maxay yihiin waxyaalaha aad samayn karto ka hor wakhtiga jifka si ay kaaga caawiyaan inaad si fiican u seexato?



Waqtigee ayaad seexan doontaa caawa?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## JIMICSO

Jimicsigu faa'iidooyin aad u weyn ayuu u leeyahay jirka iyo maskaxda. Inaad jimicsi kaa dhigaya mid neef tuuraya si joogto ah u sameyso ugu yaraan saddex jeer todobaadkii waxa ay kaa dhigi kartaa mid aad u faraxsan.

1. Ku qiimee niyaddaada hadda cabbir 1-10 ah.
2. Samee 10 daqiiqo oo boodbood ah, orod ama jimicsiga loo yaqaan barbiis (bur).
3. Ku qiimee niyaddaada ka dib cabbir 1-10 ah. Intaas ka dib ma dareentay fiicnaan?



Waa maxay hababka aad jeceshahay inaad u jimicsato?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## MUUSIG DHAGAYSO

Muusiggu wuxuu noqon karaa hab degdeg ah oo lagu kiciyo niyaddaada. Wuxuu yarayn karaa walbahaarka iyo xanuunka wuxuna xitaa kaa caawin karaa in wadnahaagu caafimaad qabo. Dhegaysashada heeso ku xasuusinaya wakhti farxad leh waxa ay soo celin kartaa xasuus farxad leh. Heesohee ayaad dhageysan kartaa ama ku heesi kartaa si aad u dareento fiicnaan?



Wa maxay heestaada farxadda leh?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD



## JAAS

Qoob-ka-ciyaarka kaliya kaama dhigayo mid ka dhigayo mid fayyo-qaba oo qura, balse wuxu kor u qaadaa niyaddaada wuxuuna kaa caawinayaa inaad la xiriirto dareenkaaga. Micno ma leh sidaad u jaaseysid. Waxaad u jaasi kartaa si doqonimo iyo xayawaanimo leh haddaad rabto. Ciyaar, hees, qayli ama ku gunuunac hees jaas yarna sameey!



Ma sameen kartaa jaas doqonimo leh kaas oo dadka ka qoslinaaya?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## KHUSHUUC

Iyadoo sidoo kale yareysa diiqadda, khushuucistu waxay kordhisaa farxadda, niyad-soojeedinta iyo xasuusta. Waxaa jira habab badan oo loo khushuuco. Isku day kuwan soo socda oo hel hab adiga kugu habboon:

- Diirada saar shay sida geed ama shumac oo kale ah.
- Ku celi kelmad aad ku nasanayso marar badan.
- Xisaabi neeftaada oo isku day inaad wax kale ka fikirin.
- Daawo neeftaada ama fikradahaaga oo imanaya haddana tegaya.
- Isku day inaad nasiso muruq kasta oo jidhkaaga ah.
- Isku day inaad qaadata wakhti aad ku dareento kaadhka fikrado badan.




Miyaad raadin kartaa dhammaan culeyska jidhkaaga kadib ma iska fasaxi kartaa?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## YAAB DABIICI AH

Inaad dabecadda la jirto, gaar ahaan geedaha, waxay u fiican tahay maskaxdaada iyo sidoo kale jirkaaga. Waqti ma ku qaadan kartaa beerta ama xadiiqadda. Ma heli kartaa dhir aad daryeesho? Soo ogow waxa ka baxa aaggaaga xilligan sanadka oo arag haddii aad abuurin karto iniin kadib daawo sida ay u korayso.



Goorma ayaad bannaanka aadi kartaa maanta?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## TABURUCAAD

Tabaruciddu maaha kaliya inay caawiso dadka kale laakiin waxa la ogaaday inay caawiso tabarucaha. Sidoo kale samaynta shay muhiim kuu ah, waxay kaa caawin kartaa inaad dareento qanaaco, waxay ku siin kartaa xirfado cusub iyo inaad hesho saaxiibo cusub oo daneeya waxyaabaha adiga aad danaysid oo kale. Xitaa waxaad samayn kartaa wax fudud sida inaad qashinka dariskaaga ka gurto muddo shan daqiiqo ah.




Yaa ama sababtee ayaad jeceshahay inaad caawiso?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## QOSOL

Qosolku waxa uu soo daayaa maadooyin kiimikaad oo farxadda kordhiya diiqaddana yareeya. Xitaa uma baahnid inaad ku qososhid kaftan si aad faa'iidooyinka u hesho. Iskuday inaad qososhid hadda. Haa, bilaa sabab. Ma nacasnimaa oo dhab ahaantii ma kaa qoslineysaa? Tan saaxiib la samee. La qoslidda dad kale waxay ka dhigtaa saaxiibtinimadeenna mid wanaagsan.



Ma samayn kartaa kaftan qof kale ka qosliya?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## ISKU DAY WAX CUSUB

Ma jiraa qalab muusig oo aad had iyo jeer rabtay inaad ku ciyaarto, meel xaafadaada ku taal oo aad had iyo jeer rabtay inaad tagto ama nooc jimicsi oo aad had iyo jeer rabtay inaad isku daydo? Isku dayga wax aanad waligaa samaynin waxa ay kor u qaadi kartaa kalsoonidaada waxayna wanaajin kartaa niyadaada. Xataa samaynta muuqaal jimicsi cusub oo onlayn ah ayaa kaa caawin kara inaad dareento fiicnaan.



Ma jiraan wax aad waligaa rabtay inaad isku daydo?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## AKHRI BUUG

Wax akhrisku waxay u roon tahay maskaxda: waxay yaraynaysaa walbahaarka, waxay wanaajisaa niyadda waxayna xitaa kaa caawin kartaa inaad noolaato wakhti dheer. Waa maxay waxa ay tahay in la jeclaamin? Waxaa jira malaayiin sheeko. Raadi mid aad jeceshahay oo kaga baxso adduunkaaga buug nasasho ah.



Sheekooyin nooc ee ah ayaad jeceshahay?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## QORRAXDA FARIISO

Qorraxda badan waa khatar hubaashii, gaar ahaan maalinta dhexdeeda, laakiin in la helo in yar oo qorrax ah maalintii waxay u fiican tahay niyadda, lafaha iyo habdhiska difaaca. Haddii aysan ka jirin qorraxi meesha aad joogto, kaliya dibadda u bax si aad u lugeyso inta lagu jiro iftiinka maalinta. Waa degdeg niyadda kor u qaadaysa oo xor ah si aad maskaxdaada u dejiso xoogaa farxad leh.



Waa kee xilliga sannadka ee aad jeceshahay?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

Waxqabadyo lagu qorsheynayo oo sida ugu fiican nolashaada aad uga faa'iideysanayo

## YOOL DEJIN

Qor 3 yool: Mid usbuuca soo socda ah, mid bisha soo socota ah iyo mid sanadka soo socda ah.

Yoolkaygu waa \_\_\_\_\_  
Waxaan gaari doonaa hadafkeyga taariikhda \_\_\_\_\_

[Goorma ayaad dhammaystiri doontaa?]

Si aan u gaaro yoolkayga waxaan u baahanahay \_\_\_\_\_

[Talaabooyinkeed ayaad u baahantahay in aad qaado si aad u gaarto yoolkaaga]



Waxqabadyo lagu qorsheynayo oo sida ugu fiican nolashaada aad uga faa'iideysanayo

## QORSHEE INAAD WANAAG DAREENTID

Dhaqdhaqaaqyo kala duwan ayaad siyaabo kala duwan u saameyn kara shucuurteena Ogoow wax qabadyada ku dareensiya:

**tamar degenaan farxad**

**la jecelyahay dhiirran xiisaynaya**

**caafimaad qaba**

Go'aanso sida aad rabto inaad dareento oo samee waxqabad kaa caawin doona inaad dareento dareenkaas.



Sidee ayaad rabtaa in nolashaadu u ekaato sannad gudihi?

Ma qorsheyn kartaa todobaadkaaga si aad u dareento dhammaan waxyaabaha aad rabto inaad dareento?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

Waxqabadyo lagu qorsheynayo oo sida ugu fiican nolashaada aad uga faa'iideysanayo

## HEL WAQTI

Ma garanaysaa sida aad wakhtigaaga u isticmaasho? Ma jiraan wax aad waligaa rabtay inaad samayso balse sidaas oo ay tahay aadan wakhti u helin? Fiiri jadwalkaaga toddobaadlaha ah iyo waxa aad ku sameyso wakhtigaaga maalin kasta. Ma laga yaabaa inaad wakhti yar ku bixiso daawashada telefishinka ama ciyaaraha kombiyuutarka oo aad hesho wakhti dheeraad ah oo aad ku sameyso waxyaabo kaa caawinaya horumarinta xirfadahaaga, maskaxdaada ama xiriiradaada?



Maxaad doonaysaa inaad wakhtigaaga firaqada ku samayso?

Waxqabadyo lagu qorsheynayo oo sida ugu fiican nolashaada aad uga faa'iideysanayo

## BARO XIRFAD CUSUB

Barashada waxyaabo cusub waxay u fiican tahay maskaxdeena maadaama ay naga caawiso inaan si dhakhso leh u baranno waxyaabaha kale. Waxaa intaa dheer waxay na siin kartaa farxad iyo kalsooni badan. Dooro xirfad cusub oo aad rabto inaad barato oo soo ogoow sida loo sameeyo adiga oo daawanaya fiidiyowiyada internetka, akhriyada buugaagta mawduuca ku saabsan ama raadinaya qof kaa caawin kara inaad barato. Waxaad baran kartaa sida loo:

**jugleeyo sameeyo jaas cusub qoro gabay ama hees raab ah**

**fargo ama tolo**

**waraaqo loo duubo ama sawir boodhadaada iskeytka loo wareejiyo**

**ciyaaro qalab muusig oo cusub**

**hadlo luuqad kale**

Jirkaaga waxaa kuu jiray wixii kale? Kartaa?



EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## KU DHAQAN KALA HORMARINTA

Kala hormarinta waxay la macno tahay inaad garato hawlaha ay tahay in marka ugu horeysa la qabto. Qor waxa aad u baahan tahay inaad qabato todobaadkan oo mudnaan kala sii liiskaaga wax-qabadka si aad u hubiso inaad ku hesho waxyaalaha ugu muhiimsan uguna degdegga badan wakhtigii loogu talagalay. OGOOW! U ma fududa sida in hawlaha loo qabto sida ay u kala horreeyaan maadaama hawlaha qaar ay qaataan waqti ka badan kuwa kale oo ay u baahan yihiin in waqti dheeraad ah horey loogu sii qorsheeyo. Sidoo kale, ka digtoonow in aadan dib u dhigin hawlaha muhiimka ah laakiin aan degdegga ahayn, sida jimicsiga iyo la kulanka asxaabta.



Waa maxay waxa kuugu muhiimsan inaad qabatid maanta?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## KOOXDAADA U MAHADCELI

xiriir kasta oo aan la leenahay qof kasta oo aan naqaan waa kala duwan yahay. Hal saaxiib ayaa laga yaabaa inuu ku fiican yahay in lala ciyaaro kubbadda cagta, laakiin aanu ahayn qof aan kala hadali karno dhibaato. Halka saaxiib kale laga yaabo inuu ku fiican yahay inuu naga caawiyo dareenkeena, laakiin gabi ahaanba aanu xiiseyneynin kubada cagta. Samee liiska asxaabta iyo xubnaha qoyska ee ku jira noloshada. Yaad kala hadli kartaa waxyaabo kala duwan? Maxaad jeceshahay inaad la sameyso dad kala duwan? Dooro laba qof oo ku jira liiskaaga kuwaas oo adiga gaar kuu ah uguna mahadceli inay kuu yihiin saaxiib.



Yaad la hadli kartaa marka aad u baahan tahay qof ku garab istaaga?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## MEEL BANNEEY

Mararka qaarkood waxaan haynaa waxyaabaha aynaan u baahnayn - tusaale ahaan boodboodka aan ku habboonayn, saacad aan shaqaynayn, ama rinjiyeynta weligeed aan dhammaanayn. Inay kugu hareereysnaadaan wax aadan isticmaalin, waxyaabo xusuus xun kugu leh ama waxyaabo ina xasuusiya hawlo aynaan dhammayn ayaa maskaxda ka saara tamarta. Hayso waxyaabaha aad jeceshahay laakiin isku day inaad gurigaaga iyo madaxaagaba nadiifiso adigoo: - siinaya dharka, alaabta lagu ciyaaro iyo waxyaalaha aanad isticmaalin asxaabta ama hay'adaha samafalka - hagaajinta waxyaabaha jabay, ama u raadinta cid hagaajisa - dib u arshadaynta intii suurto ah - tuurista waxyaabaha aan dib loo isticmaali karin, dib loo warshadayn karin ama aan la hagaajin karin.



Maxaad maanta ka tagi kartaa?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## SAADAALI WAX QABADKAAGA

Ma ogtahay inta ay kugu qaadanayso inaad samayso waxyaallaha caadiga ah sida dhar xidhashada, cadayashada ilkaha, u socoshada guriga saaxiibkaa? Marka xigta ee aad qabaneysa wax:

1. Fiiri saacadda ama qabso waqti.
2. Qiyaas inta ay kugu qaadan doonto inaad hawshaada qabato.
3. Qabo hawshaada.
4. Markaad dhammayso, fiiri saacadda mar kale ama jooji waqtiyeeyaha.
5. Intee ayaad u jirsatay waqtigii aad qiyaastay? Waqti ka dib waad ku fiicnaan doontaa inaad saadaaliso inta ay kugu qaadan doonto inaad qabato hawlaha.



Ma heli kartaa siyaabo aad si dhakhso leh ugu qabato hawlahaaga joogtada ah?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## MEEL DHIG

Haddii wax kasta oo aad leedahay ay leeyihiin meel la dhigo, waad garanaysaa meesha aad ka raadinayso. Inaad aruursanaato waxay kaa badbaadin kartaa wakhti aad isku daydo inaad wax hesho. Wax kasta oo qolkaaga yaalla ma leeyihiin meel lagu kaydiyo? Haddaysan sidaan ahayn, u kala sooc alaabtaada kooxo isku mid ah. Markaad ka dhigto rasooyin, hel sanduuqyo waaweyn oo ku filan mid kasta oo iyaga ka mid ah. Tusaale ahaan, ku rid dhammaan qalin rasaasyadaada iyo qalin biirahaaga hal sanduuq kombiyuutarka ciyaarahana mid kale. Waad qurxin kartaa sanduuqyada badarka ama kabaha, laakiin xusuusnow inaad calaamadiso sanduuq kasta si aad u ogaato meesha aad fiirinayso.



Sid baad dareemaysaa marka wax kasta oo hareerahaaga ahi isku aruursan yihiin?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## GO'AANSO INAA GUULAYSATO

Ma jirtaa xirfad aad jeclaan lahayd inaad ogaatid sida loo sameeyo? Naftaada u sheeg in kastoo aadan weli sameyn karin, haddii aad barato sida loo sameeyo oo aad si joogto ah ugu dhaqanto, waxaad awoodi doontaa inaad sameeyso. Haddii ay kugu adag tahay, sii wad isku dayga. Haddii aad qalad samayso wax ka baro. Haddii meel kugu dhegto, weydii khabiir. Marka aan nafaheena carino, waxaan ku kornaa xirfadaha iyo kalsoonida. Qor tillaabooyinka aad qaadi karto si aad u barato xirfad cusub ama si aad u hagaajiso wax aad jeclaan lahayd inaad si ka sii fiican u qabato.



Maxaadan weli qaban karin?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## SOCO ADOO ISKU FAANAYA

Maxaad ku faantaa inaad noloshada samaysay ilaa hadda? Waxaad ku faani kartaa caqabadaha yaryar ee aad ka soo gudubtay iyo sidoo kale mashaariicda waaweyn ee aad dhammaysay ama abaal-marinnaha aad ku guulaysatay. Miyaad sii waday markii wax kugu adkaadeen? Miyaad isku dayday inaad tijaabiso wax cusub? Ma geesi baad ahayd markaad cabsatay? Ma hadashay markay adkaatay? Ma iska celisay qof dadka u xoogsheegta? Samee liis sababaha ay tahay inaad ku faanto oo madaxaaga kor u qaaddo!



Maxaad ku faantaa inaad samaysay maanta?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## ISTAAG ADOO DHEER

Fadhiga ama istaagida dhabarkaaga oo toos ah waxay yarayn kartaa walbahaarka, wanaajin kartaa niyadda waxayna kordhin kartaa kalsoonida marka la barbar dhigo foorarsiga. Dhaqan geli hagaajinta qaabkaaga adiga oo ku fadhiisanaya kursi labadaada cagoodna ay dhulka si siman u yaalliin. Bal qiyaas in dun madaxaaga korkiisa ku taal kor laguugu jiidayo. Hubi in garbahaagu dabacsan yihiin (wareeji si aad u dabciso) oo si weyn u neefso. Jidhkaagu ma dareemayaa wax ka duwan? Dareenkaaga miyuu is beddelay? Sideed u xasuusan kartaa inaad si qumman u fadhiisato ama u socoto?



Sidee buu jidhkaagu dareemayaa hadda? Sidee baad u fiicnaa kartaa?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## KA SHAQEE

Ma garanaysaa shaqada aad rabto inaad qabato? Ma taqaan sida loo helo? Samee tillaabooyinkan si ay kaaga caawiyaan inaad hesho shaqadaad ku riyoonayso:

1. Hoos ku qor xirfadahan.
2. Qor waxaad jeceshahay inaad samayso.
3. Qor meelaha aad jeceshahay inaad joogtid (dibadda, badda agteeda, meel diirran).
4. Baro shaqooyinka isticmaala xirfadahaaga oo ku lug lahoow samaynta waxyaabaha aad jeceshahay inaad ku qabato meelaha aad jeceshahay inaad joogtid.
5. Soo hel sida aad ugu tababaran karto shaqada aad rabto.
6. Ka shaqee waxa aad u baahan tahay inaad diirada saarto, ama haddii aad u baahan tahay inaad sameyso wax ka duwan, si aad u hesho shaqada aad rabto.



Maxay noqon lahayd shaqadaada ugu fiican?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## NAFTAADA SII LA HADAL

Weligaa ma dhegaysatay habka aad naftaada ula hadasho? Maxaad isku tidhaahdaa marka aad diiqad leedahay? Sidee ula hadashaa naftaada marka wax kaa xanaajiyaan? Isku day inaad ogaatid waxyaabaha aad maskaxda ku hayso oo ka dhig ereyo fiican oo dhiirigelin leh sida:

- waxan waan sameen karaa!
- Si fiican ayaan iskugu dayay
- Tan ayaan wax ka baran karaa
- Waan garanayaa sida loo maareeyo shucuurtayda
- Si qoto dheer ayaan u neefsadaa, waanan deganahay



Maxaad u baahan tahay inaad naftaada u sheegto maanta?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## MAAMUL TAMARTAADA

Ka fakar inta tamar ah ee aad haysato waqtiyada kala duwan ee maalintii. Ma waxa kuu sahlan inaad awoodda saarto shaqada ugu horeyn subaxdii mise waxaad si fiican u shaqeysaa mar dambe? Goorma ayaad dareentaa inaad dhaqaaqdo? Ogoow sida heerarka tamartaadu isu beddelaan maalinta oo dhan oo qorshee shaqadaada, naso oo u ciyaar si habboon.



Goorma ayaad sida ugu fiican u shaqeysaa?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD

## HORAY U SOCO

Waa mid aad inoo soo jiidata inaynu dib u dhigno waxyaalaha aynaan rabin inaynu qabano. Laakiin haddii aan sidan sii wadno, waxaynu ku dambeyn doonaa in waxyaabaha inoogu jira liiska hawlqabadka oo badan inoo yaallaan waqtiguna yaraado. Haddaba, marka aad waqti haysato, horay u soco oo samee waxyaabaha aad hadda u baahan tahay si aad mustaqbalka wax yar u qabato oo aad u nasato. Immisa hawllood ayaad maanta ka bixi kartaa?



Maxaad samayn kartaa maanta si aad berri hawl yar u qabato?

EMOTICONS FOR A SMILEY WORLD